



# Whitechapel (2)

## Hoolal tikidh

Laga billaabo hoolka tikidhka galbeed, wiishash jaranjaro ah ayaa kuu qaadi doona maxadooyinka khadka tareenka Distric Line, labadaba waa la ballaarin doono. Wiishash jaranjaro dheeraada ayaa ku xiri doona District Line kala bedelashada jid-kuxir oo laga dhisi doona meesha ka hooseysa maxadooyina khadka tareenka East London line, oo hal tiiro u jirta waqooyiga wadada Durward Street goob loo yaqaan Essex Wharf, wiishash jaranjaro oo saddaxaad oo ka baxaya bedelashadan jid-iskuxir ayaa u kacaya dhammaadka galbeed ee maxadooyina Crossrail. Iskubedelasho Crossrail ee khadka tareenka East London line ayaa sidoo kale laga sameyn doonaa in halkan tiiro u jirta waqooyiga Durward Street.

Meel u maris khadka tareenka East London line marka laga yimaado hoolka tikidhka waqooyi ayaa noqon doona mid loo sii maro maxadooyinka tareenka District Line ee la ballaariyey iyo jaranjaro laga sameyn doono inta u dhaxeysa maxadooyinka District Line iyo East London line.

Crossrail ayaa kala tashaneysa LUL (London Underground Ltd) arrimaha la xiriira hoolka tikidhka galbeed iyo waqti u qabashada dhismaha inay ku xirnaan doonto dhameystirka shaqooyinka khadka tareenka ee District Line.

Goobta hoolka tikidhka Cambridge Heath Road, wiish jaranjaro keli ah iyo wiish dad qaada oo wadada la siman ayaa bixin doona meel loo sii maro maxadooyinka Crossrail. Goobo adeegsi oo loogu talagalay shaqaalaha isteeshinka ayaa laga sameyn doonaa dabaqa koowaad.

Motoorro hawo-siin ayaa lagu rakibi doonaa labada gees ee dambe ee maxadooyinka Crossrail, oo laga dhisi doono gudaha duleelka jid-tareen ee Durward Street dhanka galbeedka dambe iyo dhismaha hoolka tikidhka ee bari. Matooradu waxay yareynta doonaan hawo qalalka waxayna taageeri doonaan ilaalinta raaxada socotada gudaha isteeshinka waxayna sidoo kale bixin doonaan goobo adeeg baxsasho xaalad degdeg ah.

